# Xeerka Xuquuqda Macaaiisha Adeeg Daryeel Guri Bixiyayaasha Liisanka La Siiyey ee Minnesota

## Bayaanka Xuquuqaha

Macmiil ka hela adeegyo daryeel guri Bulshada La caawiyey ku nool wuxuu xaq u leeyahay:

1. Inuu helo macluumaad qoran, luuqad waadixa ah, oo ku sahabsan xuquuqda ka hor intaanu helin adeegyada, oo ay ka mid yihiin waxa la sameynayo hadii la jabiyo xuquuqdan.
2. Hel daryeel iyo adeegyo iyadoo loo eegayo qorshe ku haboon iyo waqti ku sargo'an, iyadoo ku xiran daryeel caafimaad oo la aqbalay, heerar caafimaad ama kalkaalinimo iyo xarumaha daryeelka dadka, uga qayb qaadashada si firfircoon horumarintiisa, wax kabadalkiisa, iyo qiimaynta qorshaha iyo adeegyada.
3. In loo sheego ka hor intanu helin adeegyada nooca iyo dhaqanka shaqaalaha bixinaya adeegyada, inta jeer ee booqasho la qorsheeyey in la sameeyo, akhtiyaarada kale ee diyaarka u ah waxka qabashada baahiyaha daryeelka guriga, iyo cawaaqibta diidida adeegyadan.
4. In loo horey uu ugu sheego isbadal kasta oo lagu taliyey daryeel bixiyuhu qorshaha adeega oo uu ka qaado door muuqda go'aamada isbadalada qorshaha adeega.
5. Diido adeegyada ama daaweynta
6. Ogow, ka hor inta aadan helin adeegyada ama inta lagu gudo jiro booqashada koowaad, Xadidaadaha ku yimaada adeegyada bixiyaha daryeelka guri.
7. In loo sheego ka hor adeegyada intaan la bilaabin waxa daryeel bixiyuhu ka qaadanayo adeegyada; lacag intee inleeg ayaa laga rajeyn karaa caymiska caafimaad, barnaamijyada dadweynaha, ama ilaha kale ee la yaqaan; iyo lacagta uu masuul ka noqon karo bixinteeda macmiilku.
8. Ogow inay jiri karaan adeegyo kale oo laga heli karo bulshada, oo ay ku jiraan adeegyada daryeelka guriga iyo bixiyayaashooda, oo ogow halka laga helo macluumaad ku saabsan adeegyadan.
9. Si xora uga doora daryeel bixiyayaasha diyaarka ah iyo si aad u badeshid daryeel bixiyayaasha ka dib adeegyadu intaanay bilaabmin, xaduudka caymiska caafimaadka, daryeelka caymiska mudada dheer, caawimada caafimaad, iyo barnaamijyada caafimaad ee kale ama barnaamijyada dadweynaha.
10. Lahaado xog shakhsi, maaliyadeed, iyo caafimaad oo la asturay, laguna waaniyey siyaasadaha iyo nidaamyada adeeg bixiyaha ee khuseeya sheegista xogta noocan ah.
11. Helitaanka kaydka iyo xogta qoran ee macmiilka ee kaydkaasi iyadoo la raacayo Xeerka Kaydka Caafimaadka Minnesota, Sharciga Minnesota, Qeybtiisa 144.291 ilaa 144.298.
12. Waxa kuu adeegi doona dad si sax ah loo tababaray oo carbisan inay gutaan waajibadkooda.

